

## Xiriir

La xiriir xaafadda ad degan tahay haddii ad su`aalo qabtid.

La xiriir **02 180**

Xaafad Gamle Oslo  
Xaafad Grünerløkka  
Xaafad Sagene  
Xaafad St. Hanshaugen  
Xaafad Frogner  
Xaafad Ullern  
Xaafad Vestre Aker  
Xaafad Nordre Aker  
Xaafad Bjerke  
Xaafad Grorud  
Xaafad Stovner  
Xaafad Alna  
Xaafad Østensjø  
Xaafad Nordstrand  
Xaafad Søndre Nordstrand

Oslo kommune



Waxaad ka heli karta warbixin halkaan:

[www.velkommenoslo.no](http://www.velkommenoslo.no)

[www.oslo.kommune.no](http://www.oslo.kommune.no)

[www.udi.no](http://www.udi.no)

## BARNAAMIJKA BILOWGA



WAAXDA QAXOOTIGA  
IYO MUHAAJIRIINTA



WAAXDA QAXOOTIGA  
IYO MUHAAJIRIINTA

## Muxuu yahay barnaamij bilow ah?

Barnaamij bilow ah wuxuu ku siinaya adiga barasho afka norwejiga, waayoaragnimo shaqo dalka Norway iyo korsooyin kala duwan.

Barnaamijku wuxuu soconaya wakhti buuxa oo dhan laba sano wuxuuna ku siinaya xaq kaalmo (mushaar).

## Muxuu yahay qorshe shakhsiyeed?

Qof xiriiriye ah ee xaafadaada ayaa adiga kala shaqeynaya sidii uu kuugu sameyn lahaa qorshe shakhsiyeed muddada ad adigu ka qayb qaadaneysid barnaamijka. Qorshe shakhsiyeed wuxuu ku tusaya hawlaha lagaga baahan yahay sidii ad u baran lahayd afka norwejiga iyo sidii ad shaqo u heli lahayd ama ad waxbarasho u geli lahayd. Qorshuhu wuxuu ku qaabeysan yahay baahidaada iyo qorsheyaashaada mustaqbalka.

## Kuwee ayaa la siiya barnaamijka bilowga ah?

Qaxootiga u dhexeeya 18 iyo 55 sano, ee degana Oslo wixii ka dambeeyey 01.09.2003, waxay caadi ahaan xaq u leeyihiin barnaamijka bilowga. Dadkaasi waa inay ku degenaadaan si waafaqsan heshiiska UDI iyo degmooyinka.

## Ka qaybgaleyaashu waa inay ku sugnaadaan xaalad

- Qaxooti la soo wareejiyey
- Qaxooti magangelyo siyaasadeed
- Dad ku helay degenaansho sabab bani`aadanimo
- Dad la siiyey ilaalin guud
- Dad loo keenay kuwo ka mid ah qoyskooda oo ka tirsan kooxaha kor ku xusan oo dalka degana in ka yar 5 sano.

## Masu`uliyada xaafadda

Qofka xiriiriyaha ah ee xaafaddada wuxuu kadib markuu kula yeesho wadahal ogaanaya hawlaha adiga kaa caawinaya sidii ad ku gaari lahayd ujeedooyinkaaga.

## Waa masu`uliyadaada:

- Inaad wadashaqeyn ka sameysid nuxurka qorshahaaga
- Inaad hirgelisid qorshahaaga

